



Tix-raac ah: Isu Diyaarinta ka Qeyb qaadashada Kulan Dhexdhexaadinta ee lagu Xaliyo Qilafaadka

(Checklist: Preparing for and Attending Mediation — Somali version)

Adiga iyo dugsiga ilmahaaga waxaad go'aansateen kulanka dhexdhexaadinta ah, ee lagu xaliyo qilaafaadka, ee lo yaqaan Mediation in aad ku xalisaan is afgarawaa idinka dhexeeya. Isu diyaarin taxadir leh ayaa ka caawin kara in aad si xaqiiqi ah uga qeyb qaadato nidaamka dhexdhexaadinta. Tix-raaca soo socda wa mid ka caawin kara in aad isu diyaariso.

Masuuliyadda ku saaran intaan la gaarin kulan Dhexdhexaadinta

- Qor tira liis ah ee waxyaabaha walac ka qabto, adoo u kala hor marinaya kuwa kuugu muhiimsan. Qodobka kowaad #1 wa inuu noqda kan kuugu muhiimsan oo aad walaac ka qabto.
- Isku habee waxii dukumenti ah oo saacidaya doodaada.
Dokumentiga waxa ka mid noqon kara:
 - ✓ Qiimeynta waxbarasho ee dugsiga
 - ✓ Qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed (IEP) ee ilamahaaga waqtiga xaadirka ah helo
 - ✓ Wax qiimeyn ah oo shaqsiyeed (waxbarasho ama caafimaad) ee jira
 - ✓ Warbixinta horumarka ilmahaagu ka gaarayo qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed (IEP progress report), warbixin aqlaaqda (discipline reports), iyo warbixinada waxbarashada caadiga ah (regular education report card)
 - ✓ Warbixinada aad ka hesho macalimiinta ama akhbaarada kale ee si walba ku hesho.
- Waxaad qorta liis ah waxyaabaha surrowda in ay walacaada xal u noqdaan. Maxuu noqon karaa natiijyada ugu wanaagsan ee ilmahaaga? Maxaa noqon kara natiijyo macquul ah?
- Ka fikir oo u sii diyaar garow su'aalaha shaqaalaha dugsigu ku weydiin karaan. Liis garee su'aalaha, oo ka fikir sidaad mid walba uga jawaabi laheyd.
- Hadaad u baahato qof ku codeeya waxyaabaha aad walaca ka qabto, ama ka caawiya isu diyaarinta kulanka dhexdhexaadinta (mediation), la xiriir shaqaalaha waalidka u codeeya ee hey'adda PACER.
- Fadlan ogow: Hadii kulanka dhexdhexaadinta (mediation) la isku af garan waayo, ilmahaaga waxa u sii soconaya howlahii qorshahooda waxbarashada gaar-ahaneed ku xusnaa markaa.

Kheybta aad ka leedahay inta kulanka dhexdhexaadinta lagu jiro

- La imow kulanka maskax furan iyo mowqif ah in aad heshaan xal shaqeynaya. Noqo qof hindisaa ah oo qadarinaya xalalka kale ee laguula yimid.
- Si fasiix ah uga hadal aragtidaada, adoo isticmaalaya dokumenti loo tix-raaca ra'yigaada.
- Si ixtiraam leh u dhegeyso ra'yiga dugsigu soo jeedinayo, ee ha ka dhex gelin. Weydii su'aalo oo qadari codsigooda, xitaa haduu ka duwan yahay ra'yigaaga.

-
- Filo in shaqaalaha dugsigu dhegeysto aragtidaada, oo aysan ka dhex galin.
 - Waxaa laga yabaa in walacaagu sabab yahay wax horey u soo dhacay, lakiin xoogga saar in aad ka fikirto waqtiga xaadirka ah iyo waxii ka dambeeya.
 - Waad codsan karta in waqti lagu siiyo, oo aad dibadda gooni ula baxdo dadka ku saacidaya, ama qofka idin dhex-dhexaadinaya.

Kheyraad.....

Xarunta PACER – Tel (952)838-9000; kan lacag la'aanta ah (800) 537-2347; Bogga webside-ka PACER.org;
Cinwaanka email-ka: PACER@PACER.org

Raqamka Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota – Tel (651) 582-8689
Bogga emailka: <http://education.state.mn.us/MDE/index.html>